

Sambalka Warqada Waalidka/Qoyska
Comprehensive Sexual Health Education Requirements (Shuruudaha Waxbarashada Caafimaadka
Galmada oo dhamaystiran)

Waalidiinta iyo Qoosaska Qaaliga ah,

Waxaan jeclaan lahayn inaan idin ogeysiino shuruudo waxbarasho oo looga baahayhay dugsiyada oo la xiriirta waxbarsahada caafimaadka galmada iyo sida tani aay u samayn karto waxbarashada ilmahaaga. Sanadkii 2020 Aqalka sharci dejinta Washington State (Washington State Legislature) wuxuu meel mariyay shuruud cusub ([RCW 28A.300.475](#)) oo ah in dhammaan dugsiyada ay bixiyaan waxbarasho caafimaad oo laxiriira galmada oo dhameystiran.

Waxbaarashaada Caafimaadka galmada oo dhameystiran waxa loogu qeexay sharciga inay tahay tilmaan ku saabsan kobaca aadanaha iyo taranka taas oo dhaceeyso waqti kadib oo aay samayso da'da oo aay ku jiraan dhamaan ardeyda.

Degmadeena waxay sii wadi doontaa go'aan ka gaarista manhajka iyo agabyada waxbarasho ee aan u isticmaalno waxbarashada caafimaadka galmada. Ma jirto hal manhaj oo kali ah oo looga baahan yahay inay isticmalaan dugsiyada Washington.

Iyada oo ku saleysan sharciga, ardayda dhigata fasalada K-3 waxay heli doonaan barashada dareenka bulshada. Ma jiro wax ku saabsan caafimaadka galmada oo looga baahan yahay ardayda fasallada K-3. Barashada shucuurta iyo bulshada waa barashada sida loola xiriiriyo si xushmad leh, sida loo samaysto saaxiibo si caafimaad qaba, sida loo ixtiraamo booska shakhsiga ah, iyo sida loo maareeyo shucuurada

Ardayda dhigata fasalka 4 ama 5 waxay helayaan waxbarasho ku saabsan caafimaadka galmada ugu yaraan hal mar. Waxbarashada koritaanka iyo horumarka bani'aadamka (qaangaarka) oo waxay sida caadiga ah ka bilaabataa fasalka 5aad

Ardayda da'da weyn waxay heli doonaan macluumaad da'dooda ku haboon oo ku saabsan koritaanka iyo horumarka aadanaha iyo hubnaha taranka, xiriirada caafimaadka leh, oggolaanshaha, ka fogaanshaha, cudurada galmada lagu kala qaado (sexually transmitted diseases, STDs), iyo hababka ka hortaga uurka. Waxaan siin donaa waxbarasho ugu yaraan labo jeer ardeyda dhigato fasalada 6-8 iyo ugu yaraan labo jeer fasalada 9-12

Waxaad awoodi doontaa in aad ilmahaaga ama caruurtaada kala baxdo waxbarashada adigoo codsi qoraal ah soo gudbinaya, waxaadna awoodi doontaa in aad dib u eegto manhajkeena caafimaadka galmada kahor inta aanad bilaabin waxbarashada.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan RCW 28A.300.475 iyo shuruudaheeda, fadlan booqo Xafiiska Kormeeraha Waxbarashada Dadweynaha (OSPI) website: [Sexual Health Education \(ospi.k12.wa.us\)](#)

Fadlan ha ka waaban inaad nala soo xiriirto haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Si daacadnimo leh,

Sambalka Warqada Waalidka/Qoyska
Comprehensive Sexual Health Education Requirements (Shuruudaha Waxbarashada Caafimaadka
Galmada oo dhamaystiran)

Maamulaha Dugsiga/Kormeeraha Guud ee Degmada